Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Wasaaradda Maaliyadda
Xafiiska Wasiirka

جمهورية الصومال الفيدرالية
وزارة المالية
مكتب الوزير

Federal Republic of Somalia
Ministry of Finance
Office of the Minister

**MOF/OM/1332/2023** **July 23, 2023**

**XEER-NIDAAMIYAHA CANSHUURTA GEDIS-LAYDA[1] (TURNOVER TAX)**

**WASIIRKA MAALIYADDA EE DAWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA**

**Markuu arkay:** Qodobka 12 (a) ee Xeer Lr. 5 ee ku saabsan faa'iidada la-canshuuri karo, kaas oo sheegaya in cashuurta faa'iidada lagu dalaco "faa'iidada laga helo hawlo kasta oo warshadeed, ganacsi, xirfadeed ama farsamo";

**Markuu arkay:** Ujeedooyinka Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud ee lagu sheegay Qodobka 1 (2) ee ah maamulka dhammaan arrimaha la xiriira maareynta Maaliyadda Guud ee Jamhuriyadda Federaalka Soomaaliya; iyo Awoodaha Wasiirka Maaliyadda ee ku cad Qodobka 6-aad ee Sharciga Maamulka Dakhliga oo awood u siinaya Wasiirka Maaliyadda inuu soo saaro xeer-nidaamiyeyaal lagu dhaqan-gelinaayo sharciyada dakhliga ee Dalka;

**Markuu fahmay:** Nidaam la'aanta kajirta ganacsiyada yaryar ee la xiriirta in aysan haysan diiwaanno sax ah, islamarkaasna aysan inta badan sameyn xisaab xirka sanadlaha ah, taasoo ka dhigaysa mid aan suurtogal aheyn in lagu soo rogo cashuurta faa'iidada ah ee lagu leeyahay shirkadaha kale ee waaweyn;

**Markuu tixgeliyay:** Tala-soojeedinta Agaasimaha Guud ee Dakhliga;

**Wuxuu soo saaray Xeer-nidaamiyahaan soo socda:**

[1] Waxaa loola jeeda ganacsiyada yaryar ee wadarta iibkoodu aanu dhaafin $50,000 sanad maaliyadeedka gudahiisa.

## Qodobka 1-aad

## Ujeedada Xeer-nidaamayaha

1. Ujeedada Xeer-nidaamiyahaan ayaa ah in la jaangooyo Canshuurta Gedis-Layda (Turnover Tax) ee lagu soo rogay ganacsiyada yar yar ee aan u nidaamsaneyn bixinta cashuurta faa'iidada (corporate tax) ee laga qaadayo shirkadaha waaweyn iyo kuwa dhexe.

2. Xeer-nidaamiyahaan ma saamaynayo canshuurta ku waajibtay mushaarka, midda iibka, iyo cashuuraha kale ee laga rabo ganacsiyada yaryar, marka laga reebo canshuurta gediska (turn-over tax) ee laga rabo ganacsiyada yaryar, kaas oo dib loogu nidaamiyay Xeer-nidaamiyahaan.

3. Xeer-nidaamiyahaan maqabanaayo ganacsiyada yaryar ee bixiya adeegyada xirfadeed (professional services) sida adeegyada sharciga, xisaabinta, suuqgeynta dhijitaalka ah iyo adeegyada la midka ah. Faa'iidooyinka ganacsiyadan yar yar waxaa lagu canshuuri doonaa sharciga canshuurta faa'iidada ee hadda jira.

## Qodobka 2-aad

## Astaynta Ganacsiga Yaryar (Designation of Small Businesses)

1. Erayga **"ganacsi"** waxa loola jeedaa urur ama shirkad ku hawlan hawlo ganacsi, warshadaynta ama xirfadeed.

2. Ganacsiyada yaryar oo aan kaydin buugaagta xisaabaadka saxda ah, walibana aan sameyn xisaab xirka sanadlaha ah kuwaa oo dakhligooda guud sanadkii yahay konton kun oo dollarka Maraykanka ah ama ka yar (50,000 or less) waxaa loo astayay inay yihiin ganacsi yaryar (small business), balse, iyada oo aan waxba laga bedelleyn qeexitaanka hore, ganacsiyada yaryar ee leh nidaam maaliyadeed oo sax ah laakiin dakhligoodu yahay konton kun oo dollarka Maraykanka ah ama ka yar (50,000 or less) waxaa iyagana loo astayay inay yihiin ganacsiyo yaryar.

## Qodobka 3-aad

## U diiwaangelinta ganacsiyada yaryar ujeeddooyin canshuureed awgeed

1. Dhammaan ganacsiyada yaryar, haddii ay yihiin kuwa hadda shaqaynaya ama kuwa cusub, waxa laga rabaa inay iska diwaan-geliyaan Xafiiska Diwaangalinta Canshuur Bixiyaha *(Taxpayer Registration Office)* ee Agaasinka Guud ee Dakhliga ee Wasaaradda Maaliyadda oo ay qaataan shahaadada diiwaangelinta.

2. Agaasimaha Waaxda Canshuuraha Berriga ayaa u xilsaaran diyaarinta warbixin sedex biloodle ah oo lala wadaagaayo Agaasimaha Guud ee Dakhliga iyo Wasiirka, isbuuc ka dib dhamaadka rubaca, taasoo muujinaysa arrimaha soo socda:

b) Liiska tirada ganacsiyada yaryar  kuwaas oo la diiwaan galiyay, laguna soo rogay canshuurta gedis-leyda (Turnover Tax);

t) Dakhliga laga soo ururiyay ganacsiyadaan rubuci dhamaaday; iyo

j) Caqabadaha saameeynaya ururinta dakhligan iyo qorshaha suurtagalka ah ee lagu wajahayo.

3. Xafiiska Diwaangalinta Canshuur Bixiyaha *(Taxpayer Registration Office)* waa inuu si lacag la'aan ah ku siiyaa ganacsi kasta oo loo diiwaan galiyay inuu yahay ganacsi yar, Shahaadada Asteynta Ganacsiyada Yaryar (Small Business Designation Certificate) taasoo u kala saari doonta ganacsiyada yaryar labada darajo ee ka muuqata shaxda hoose:

| **Darajada Gancsiga** | **Gediska Guud ee Sanadlaha ah (Annaul turn-over)** |
|---|---|
| Darajada 1-aad | ≤ $10,000  (Toban kun ama in ka yar). |
| Darajada 2 -aad | $10,001 ilaa $50,000. |

4. Dhamaadka bil kasta, Madaxa Xafiiska Diwaangalinta Canshuur Bixiyaha *(Taxpayer Registration Office)* waa inuu ka soo qaataa dhammaan hay'adaha Dowladda ee diiwaangeliya ama bixiya shatiyada sida Wasaaradaha, Hay'adaha, iyo Maamulka Gobolka Banaadir, liiska ganacsiyada bishaas la diiwaangashay ama shatiga la siiyay ee aan ku jirin diiwaanka Wasaaradda Maaliyadda.

**5.** Sannad kasta dhammaadkiisa, waxaa la hubin doona in ganacsiyada loo asteeyay in ay yihiin kuwa yar yar ee weli gediska guud ee sanadlaha ah (annual turn-over) yahay midka ganacsiga yar yarka ah ee lagu xussay Qodobka 2(2) ee Xeer-nidaamiyahaan. Hubinta waxa fulinaya Waaxda Canshuuraha Berriga oo kaashaneysa Xafiiska Diwaan galinta Canshuur Bixiyaha *(Taxpayer Registration Office),* iyadoo Agaasimaha Waaxda Canshuuraha Berriga uu warbixin faahfaahsan oo ku saabsan natiijada hubinta u gudbinaayo Wasiirka iyo Agaasimaga Guud ee Dakhliga muddo ku siman 30 maalmood kadib dhamaadka sanadka.

## Qodobka 4-aad

## Canshuurta Gedis-Layda lagu soo rogay ganacsiyada yar yar iyo habka canshuur bixinta

1. Gediska guud ee sanadlaha ah ee ganacsiyada yaryar ee lagu asteeyay Qodobka 2(2) ee Xeer-nidaamiyahaan waxaa lagu soo rogay Canshuurta Gedis-Layda (Turnover Tax), taaso qiimaheeda lagu qeexay shaxda ku qoran hoos:

Btty

| Darajada Gancsiga | Gediska Guud ee Sanadlaha ah (Annaul turn-over) | Canshuurta ku waajibtay |
|---|---|---|
| Darajada 1-aad | ≤ $10,000 (Toban kun ama in ka yar). | Canshuur go'an oo dhan $150. |
| Darajada 2 -aad | $10,001 ilaa $50,000. | 1.5% (Hal dhibic shan boqolkiiba) oo ku dhacaysa gediska guud ee ganacsigaas sameeyay ama iibiyay. |

2. Canshuurta Gedis-Layda (Turnover Tax) waxaa lakala bixinayaa afar jeer sanadkii, iyadoo ganacsiyada yaryar laga rabo in ay bixiyaan qeybta canshuurta ku waajibtay dhammaadka saddexdii biloodba mar.

3. Si loo fududeeyo ururinta Canshuurta Gedis-Layda (Turnover Tax), ganacsiyada waxa looga baahan yahay inay ka helaan qaansheegad muujinaysa qadarka laga rabo Waaxda Canshuuraha Berriga ee Wasaaradda Maaliyadda ka hor inta aysan bixin cashuurta.

4. Marka uu codsanayso qaansheegadka canshuurta (tax invoice), ganacsigu waa inuu u soo gudbiyaa Waaxda Canshuuraha Berriga nuqullada dukumentiyada soo socda, in kasta oo ay Waaxdu codsan karto dukumentiyo kale oo aan ku jirin liiskan:

b) Nuqulka Shahaadada Asteynta Ganacsiyada Yaryar (Small Business Designation Certificate) ee ugu dambeeyay;
t) Qoraal ka kooban hal bog oo tilmaamaya nidaamka maaliyadeed iyo xisaabaadka oo ganacsigu isticmaalo;
t) Bayaanka maaliyadeed (Financial statement), ama haddii aan la heli karin, warbixin yar oo tilmaamaysa faa'iidada uu samayay ganacsigu sannadkii u dambeeyay; iyo
x) Macluumaadka mushaharka shaqaalaha (Payroll information).

**Qodobka 5-aad**
**Ka warbixinta dambiyada**

1. Haddii Waaxda Cashuuraha Berrigu ay tuhunto in diiwaannada iyo dukumentiyada uu maamulka ganacsiga usoo gudbiyay aysan sax ahayn ama ay yihiin dukumentiyo la been abuuray, waxey la wadaageysaa Unuga Kormeerka Canshuuraha Berriga si ay ugu sameeyaan baaritaan, iyagoo kaashanaya Ciidanka Ilaalinta Canshuuraha. Hadii Unuga Kormeerka Canshuuraha Berriga uu baaritaanka kusoo ogaado in qaar ama dhammaan dukumentiyada maamulka ganacsigu usoo gudbiyay Waaxda Cashuuraha Berriga aysan sax ahayn ama ay yihiin dukumentiyo la been abuuray, waxaa looga baahan yahay inay warbixintaan u gudbiyan

Agaasimaha Guud ee Dakhliga si uu ula wadaago Xeer Ilaaliyaha Guud oo markaas ka gudan doona waajibaadkiisa ku xusan sharciga.

**Qodobka 6-aad**
**Xallinta Cabashooyinka**

1. Ganacsi kasta oo hoos yimaada Xeer-nidaamiyahan oo ka cabanaya go'aan kasta oo lagu soo rogay oo khuseeya arrimaha Xeer-nidaamiyaha lagu maareynaayo, waxay cabasho usoo diri karaan Guddiga Xallinta Cabashooyinka oo ka kooban xubnaha soo socda:

| | | |
|---|---|---|
| i. | Agaasimaha Guud ee Dakhliga. | Gudoomiye. |
| ii. | Sarkaal sare oo ka tirsan Wasaaradda oo ku takhasusay sharciga. | Xubin. |
| iii. | Sarkaal sare oo ka tirsan Wasaaradda oo ku takhasusay xisaabaadka. | Xubin. |

2. Guddigu waxay go'aankooda ku gaarayan 15 maalmood gudahooda laga bilaabo maalinta la soo gudbiyay cabashada.

3. Haddii qofka cabashada soo gudbiyay ku qanci waayo go'aanka Guddiga, wuxuu rafcaan u qaadan karaa maxkamadda awoodda u leh.

**Qodobka 7-aad**
**Dhaqangalka**

1. Xeer-nidaamiyahaan waxa uu dhaqan galayaa maalinta uu saxiixo Wasiirka Maaliyadda.

2. Canshuurta lagu soo rogay Xeer-nidaamiyahaan waxaa lagu dabaqaya dhammaan ganacsiyada yaryar laga bilaabo marka uu dhaqan-galo.

3. Marka la saxiixo Xeer-nidaamiyahaan waxaa lagu daabacayaa bogga internetka ee Wasaaradda Maaliyadda.

Taariikhda: 23/07/2023

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA / FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA / OFFICE OF THE MINISTER / XAFIISKA WASIIRKA / MINISTRY OF FINANCE / WASAARADDA MAALIYADDA

**Xildh. Biixi Iiman Cige**
**Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda**
**Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya**